



## *Macluumaadkii ugu danbeeyay ee Mashruuca Casriyaynta Ida B. Wells ee Xagaaga 2024*

Ida B. Wells High School & Ida B. Wells Qoysaska Muhiimka ahow,

Horumar weyn ayaa laga sameeyay naqshadaynta Ida B. Wells High School ka cusub, laakiin caqabad weyn ayaa jirta: maalgalin loo helo dhismaha dugsiga. Maalgalintaas waxaa loo baahan doonaa inay ka timaado sanduuqa horumarinta mustaqbalka maaliyadeed ee PPS. Markii hore waxaa loo jadwaleeyay in laga dhigo Noofambar, 2024, codbixin, ayay Guddiga Dugsiga PPS ku go'aamiyeen in loo baahanyahay wakhti dheeraad ah si loo go'aamiyo baaxadda howshaan guud. Waxay hada soojeedinayaan waxaa kamid ah maalgalinta codbixinta Maajo 2025.

IBW ga cusub wuxuu noqon doonaa dhisme afar dabaq ah oo balaaran oo leh goobo loogu tala galay tacliinta iyo caawimaadda oo heerkii ugu sareeyay ah, oo ay kujiraan goobo u gaar ah waxbarashada barnaamijyada Waxbarashada Xirfadaha Gaarka ah ee Wells [CTE]. Waddada iyo garoonka meel kale ayaa loo badalayaa dib u habayn ayaana lagu samaynayaa, taasoo abuuraysa qaab ka dhigaysa in lasoo aado xarunta ayada oo goobta laga soo galayo dhinaca Capitol Highway. Si aad u ogaato tafaasiil dheeraad ah oo mashruuca ku saaban fadlan ka eeg [warbixintii ugu danbaysay ee Casriyaynta IBW](#). [Español](#) | [Tiing Viit](#) | \_\_\_\_\_ | [Soomaali](#) | \_\_\_\_\_

Haddii maalgalinta la helo Maajo 2025, waxaa dhismaha loo jadwalayn doonaa inuu bilowdo Juun, 2026, uuna sii socdo labada sanno ee soo socota. Ida B. Wells cusub waxaa la furi doonaa xagaaga 2028. Ardayda iyo shaqaaluhu waxay joogi doonaan goobta inta dhismaha dugsigu socdo.

Todobaadyada soo socda, waxaa jiri doona siminaaro dheeraad ah oo loogu tala galay Naqshada Bulshada halkaas oo aad aragtidaada kula wadaagi karto kooxda mashruuca wadda. Siminaarka xiga ee Naqshadda Bulshada ee IBW wuxuu noqon doonaa  
wuxuuna ka dhacayaa IBW  
cafeteria.

Websaytka casriyaynta Ida B. Wells, [www.pps.net/IdaBWellsBond](http://www.pps.net/IdaBWellsBond), waxaa kujira horumaradii ugu danbeeyay ee uu mashruucu sameeyay, liiska fursadaha ka qaybgalka ee soo socda, iyo macluumaadka kulamadii hore iyo bandhigyada la daalacan karo.

Waad ku mahadsantahay sida aad nooga caawinayso abuurista Ida B. Wells High School oo casri ah.